# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1041
# WARQADDII KOWAA EE RASUUL BUTROS
# 3:2-6

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."** Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Waxaa warqaddu isugu jirtaa waxbaris, guubaabo iyo weliba dhiirrogelin.

Isagoo hoga-tusaalaynaya masiixyiintii wakhtigiisa iyo weliba kuweenna maata nool, ayaa waxaa rasuuul Butros haatan uu wax ka leeyahay wada noolaanshaha ninka iyo naagta is-qaba. Waxaana rasuulku leeyahay, sida ku qoran Warqaddiisii kowaad cutubka 3:1. Waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Sidaas oo kalena, dumar yahow, ninkakiinna ka dambeeya in xataa haddii qaar uusan erayga addeecin**

**ay erayga la'aantii ku soo hanuunsamaan dabiicadda afooyinkooda."**

**SONG: REEL---CUT------**

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay dhegaystayaal aayaddii kowaad ee cutubka saddexaad ee Warqaddii rasuul Butros waxaanan idiin kala dhignay aayadda kowaad ee cutubka saddexaad oo ka bilaabanaysa baalka 407 ee Axdiga Cusub. Rasuul Butros wuxuu ka hadlayaa hablaha sida wanaagsan uga markhaati-fura Masiixa, oo raggooda ku soo hanuuniya dariiqada masiixinnimada. Waxaa kaloo hablaha ka hadlay rasuul Bawlos sida ku qoran Warqaddiisii reer Efesos cutubka 5aad, ka bilaabata aayadda 18aad. Ha yeeshee labada rasuul dhinacyo kala duwan bay ka hadlayeen.

Rasuul Bawlos wuxuu ka hadlayey ragga iyo dumarka uu ruuxa Rabbiga ku jiro. Haddaba waxaannu caaway horey u sii wadaynaa sharraxaaddii aynu ka bixinaynay guurka u dhexeeya ninka iyo naagta oo aannu idiin sheegnay inuu saddex qaab oo kala duwan ka kooban yahay. Xalay waxaannu idiin sheegnay in guurka labada qof ee ragga iyo dumarka dhex-maraya uu yahay mid xagga jidhka ah.

Ninku naagta waa u baahan yahay naagtuna ninka way u baahan tahay. Waxaa la kala leeyahay dano ah in reer la yeesho, ubad la koriyo, ama nolosha la wadaago xitaa haddaan ubad laysku dhalin. Qofka dumarka ah waa caawisada ninkeeda, ninkuna naagta wuxuu u yahay raasumaal, isaga la'aantiis noloshu way ku adkaanaysaa. Markaa waa loo baahan yahay xiriirka muuqda ee u dhexeeya ninka iyo afadiisa, waana in taas maanka lagu hayo. Haddaba tan labaad

ee guurku ka kooban yahay waxaa weeye arrimo masixiyan ah oo fahamkoodana ay muhiim tahay. Waxaa markaas munaasab ah in ninka iyo xaaskiisa ay isku si wax u sameeyaan, ama ay hal dhinac u socdaan.
Tusaale ahaan haddii ninku doonayo inuu dad gaar ah ee ay saaxiibbo yihiin uu la socdo, naagtuna ayan doonayn in ninkeedu raggaas ama asxaabtaas isaga la socdo.
Waxaa loo baahan yahay inuu iyada kala tashado. Haddii ay ka hor timaaddo xiriirka ninkeedu la yeelanayo dadka kale, sabab ayaa jirta waana inuu ku raaco xaaskiisa, markaa asbaabta loo fasiro.
Naagtuna haddii ay dumar aanu ninkeedu jeclayn la socoto ama ay doonayso inay baayac-mushtar la samayso uu ka hor yimaado, waa inay xushmayso go'aankiisa markii sababta la wada fahmo. Waa in naagtu ay ninka wax waliba ku taageerto ninkuna uu wax waliba ku taageero naagtiisa.
Naagtu maahan inay dhegaysato ama ay u uur-dabacdo hormo dad ah oo ninkeeda xamanaya ama xumaan ka sheegaya, ninkuna waa inuu ka hor yimaado cid waliba oo xaaskiisa kala hadlaysa isaga. Wixii dhibaata ah ee jira waa in labada qof ay si deggan oo maskixiyan ah ay uga wada hadlaan. Ninku ha ka hor yimaado cay waliba oonaagtiisa loo geysto.
Naagtuna isla sidoo kale waa inay ka hor timaaddo cid waliba oo ninkeeda xumaan ka sheegaysa, haba ahaadeen saaxiibbadeeda ugu dhow. Wax waliba isku si bay u wada samaynayaan, wixii ninku diiddan yahay naagtuna waa inay ka hor timaaddo, wixii naagtu diiddan tahayna ninku waa inuu ka hor yimaado. Walibana waa in qofba kan kale ku hiwaayad noqdo,

hadday tahay dhanka heesaha, ciyaaraha iyo wixii la halmaala.

Kaba soo qaad in adigu aad la jirto Manchester United, waxaa wanaagsan in xaaskaaguna ay jeclaato Manchester United. Habase yeeshee haddii xaasku ayan doonayn ee ay hore taageere ugu ahayd Arsanal maahan inaad ku khasabto kooxdaada. Waxaa sidaas loo yeelayaa waa in layska ilaaliyo muran iyo in waxyaabaha qaar laysku diido.

Waxaa lamaanayaasha is-qaba u wanaagsan inay wax waliba isku waafaqaan, oo aanay is-mucaaradin. Haddaba taasina waa arrinka labaad ee uu guurku ka kooban yahay, waana dhanka Maskaxda. Ninka iyo naagtu waa inay ka midoobaan dhanka xagga maskaxda iyo fikirka si aan waxba laysugu khilaafin. Tan saddexaad ee guurku ka kooban yahay waxaa weeye, dhanka ruuxa ama cibaadaysiga, waxaana la adkaynayaa in qofku guursado haweenay waxa isaga uu aaminsan yahay iyana aaminsan.

Waxaana labada is-guursanaysa la doonayaa inay masiixyiin wada noqdaan. Markii dhibaato iyo shiddo iyo calool-xumo ay timaaddo, oo labada qof ee is-guursaday ay is-qabtaan waxaa loo baahan yahay inay Ilaah u jeestaan, oo Ilaah baryo la hor-yimaadaan. Maxaa wacay xiriirka labada qof ayaa aasaas u ah dawladda ama qaranka.

Labadii qodob ee hore oo guurku uu ka kooban yahay si fudud bay u jebi karaan, laakiin haddii labada qof ay isku si Ilaah u aaminsan yihiin, oo ay Masiixiyiin yihiin, in guurkaasu soo dhammaado looma fadhiyo. Dad badan ayaa waxaana kitaaabka Wacdiyaha ee uu qoray Sulaymaan uu leeyahay sida ku

qoran 4:12 oo leh:
"Oo hadduu nin ka adkaado mid keligiis ah kollay laba way hor joogsan doonaan. Xadhig saddex qaybood laysugu soohay dhaqso uma kala go'o.”
Haddaba haddii guurku uu saddexaad qaab ka kooban yahay, ma sahlana inuu degdeg u go'o ama looma fadhiyo inuu sood hammaado.
Ha yeeshee haddii qodobka saddexaad oo ah in labada qof ay isku waafaqsan yihiin rumaysadkooda, ayaa waxaa hubaal ah in guurkaasu uusan sal-dhigaynin. Waxaa saldhiga guurka labada qof ay isku si Ilaah u wada caabudayaan, oo waxaa sal-dhiga guurka labada qof ay Masiixa u wada adeegayaan. Waxaa qorniinku inoo sheegayaa ama uu inagu adkaynayaa, **"In wixii Ilaah isku xiray aanu ninna kala furin, ama kala wadin."**
Waxaannu haddaba ka hadlanay xiriirka guurka ee u dhexeeya labada qof ee masiixyiinta ah. Kaba soo qaad, in qofka dumarka ah ay guursatay nin aan Masiixi ahayn. Haddaan ku bilawno ma wanaagsana in qofka Masiixiga ah uu guursado qof kale oo aan masiixi ahayn. Haddaba qofkii guursada qof aan raacsanayn Masiixa, dhibaatadiisu ma yaraan doonto. Balse Hablaha waxaa la doonayaa inay Ilaah ugu markhaatifuraan sida ay u xanaanaynayso ninkeeda oo ay daacadda ugu tahay. Ninkana waxaa laga doonayaa, haddiiba ay dhacdo inuu guursaday qof aan raacsanayn Masiixa, inuu Masiixa ugu markhaatifuro sida uu xaaskiisa u dhaqanayo, iyo sida uu daacadda ugu yahay, ama u jecel yahay. Waayo qorniinku wuxuu leeyahay, **"Raagow, naagihiinna jeclaada, isla sida Masiixu u jecel yahay kiniisaddiisa."** Markaa ninka

masiixiga ah waa khasab inuu xaaskiisa aas iyo aad u jeclaado, oo uu welibana xanaanaysto, iyo inuusan naag kale la guursan, waayo Ilaah baa diiday taas, oo wuxuu leeyahay,

**"Ninkii naagtiisa ka taga oo naag kale guursadaa wuu sinaystaa, haddii waxa naagtii hore uu uga tegay ayan sino ahayn."**

Ninku wuxuu naagtiisa ku furi karaa oo kaliya haddii uu sino ku qabto laakiin si kale kuma furi karo. Ilaah haddaba innaga dooni maayo in kuweenna masiixyiinta ah aynu isku qasno wax waliba. Haddii ay suurowdo waa inaynu marka hore raadsanno haweenay masiixiyad ah. Haddii kalena waa inaynu raadsanno mid aan ka soo hor-jeedin masiixinnimada.

Haddii kale waxay noqonaysaa inaad la mid noqoto ninkii isku xiray dibiga iyo dameerka ee beerta ku wada falay. Marka ay sidaas tahay Ilaah wuu ka soo hor-jeedaa ama wuu neceb yahay in wax laysku qaso, oo wuxuu leeyahay sida ku qoran kitaabkii shanaad ee Muuse oo loo yaqaanno sharciga ku-noqoshadiisa 22:10, markaasoo qorniinku leeyahay:

**"Waa inaadan beer ku jeexin dibi iyo dameer wada jira."**

Marka Ilaah sidaas uu leeyahay wuxuu ka soo hor-jeedaa isku qasnaanta. Adiga masiixiga ahna kuuma wanaagsana inaad noqoto nin wax waliba isku qasa, haddii kale Ilaah baad ku xad-gudbaysaa. Waxaa jira kuwo badan oo wax isku qasa oo guursaa gabdho ama rag ayan isku fikir iyo fiiraba ahayn, oo dhib weyn baa ka haysta. Waxaa haddaba maalin aan dhowayn ii yimid gabar masiixiyad ah waxaanay ii sheegtay in ninka ay imminka is rabaan uusan weli masiixi

noqon, laakiin waxay tiri, waxaan doonayaa inaan ku soo dabbaalo saaxiibkay Ciise Masiix. Waxaan markaa ku iri miyuu imminka isagu noqday Masiixi, haddii aad ku dirqisay ama kala hadashay. Waxay igu tiri maya, waxaan markaa u sheegay inta ayan guurkeeda u guda-gelin inay aad isaga eegto sida uu ku yahay Injiilka.

Haddii uusan waxba ka qabin Injiilka, iyo figradaha wacan ee ku qoran ee khuseeya sida ninku ula macaamiloonayo xaaskiisa, markaa way habboon tahay inay iska guursato. Haddiise qofku had iyo goorba uu been ka sheegayo Masiixa, markaa dhibaato weyn buu mustaqbalka la imanayaa.

Haddaba waxaa rasuul Butros uu halkan ku adkaynayaa in qof masiixi ah xiriir guur dhex mari karo qof aan Masiixa raacsanayn. Habase yeeshee maahan in qofka masiixiga ah ee guursada qof aan Masiixi ahayn, uu mar waliba wacdiyo mataankiisa ama mantaantiisa kale ee uu jecel yahay ee ay guurka ku kulmeen ama midoobeen.

Waxaa la doonayaa si ikhtiyaar ah inaynu u wacdinno, haddii qofka inala jooga uu ku beddelmayo iyo haddii kale. Mase ahan in naagaha ama ragga masiixyiinta ah ay wax waliba ku raacaan lamaanayaashooda aan weli Masiixa soo raacin. Maahan inay qaad ama qamri la cabbaan.

Sababtaas aawadeed ayaa loo hor joogsanayaa in qof Masiixi ah uu guursado qof aan Masiixi ahayn. Balse haddii ay dhacdo waa in qofka Masiixiga ah uu weligii u markhaatifuraa Masiixa, xitaa haddii taasu ay keenayso in xiriirkii guurku burburo ama dumo.

Waxaa su'aalo layska weyddiiyaa in labada is-qabta

ee kala rumaysadka ah sida ay isku waafaqayaan. Wacdiyayaasha qaar ayaa waxay adkaynayaan in qofka masiixiga ah haddii uu dumar yahay uu aqbalo wax kasa ee ninkeedu u sheego, laakiin dhibaato iyo jahawaree bay taasu keenayaa ugu dambaynta. Markaa waxa inoogu qoran warqaddan kowaad ee rasuul Butros 3:1, markaasoo rasuulku lahaa:

**"Sidas oo kalena, dumar yahow, ninmakiinna ka dambeeya in xataa haddii qaar uusan erayga addeecin ay erayga la'aantiis ku soo hanuunsamaan dabiicadda afooyinkooda,"** ayaan loo qaadan karin in rasuul Butros aanu ku khasbaynin hablaha inay raggooda aan masiixyiinta ahayn hoos yimaadaan. Waayo haddii kale waxaa niyad jebaya hablaha masiixiyiinta ah, waxaase la doonayaa inay ikhtiyaarkooda hawsha wacdiska raggooda ku sameeyaan, waxaanay raggooda u wacdiyayaan si qarsoon oo laakiin ficil ah. Wacdiskeedana loo qaadan maayo inay yihiin wax ajar ay ku helayso.

Laakiin waa hawl ay ikhtiyaar ku samaynayso. Mase ahan wax lagu khasbayo inay samayso. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal barnaamijka ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 3:2, baalka 407 ee Adiga Cusub, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Markay arkaan dabiicaddiinna daahirsan ee cabsida leh."** Waxay raggu soo hanuunayaan waa kuwa qalbigoodu taabto daacadnimada haweenkooda masiixiga ahe, markii ay arkaan dabiicaddooda daahirsan ee cabsida Ilaah leh oo ka muuqata, oo aan lagu arg jacaylka lacagta iyo wixii la mid ah. Taasina waa markhaatifurka adiguba aad bixin karto

haddii aad masiixi tahay. Haddaba waxaa jira haween badan oo aan raggooda ku khasbi karin waxa ay doonayaan, iyo kuwa hibo Ilaah u siiyey oo ragga ka adag. Markaa waa kuwa raggooda ka adag ama ka gacan sarreeya ama ka burji sarreya oo welibana daacadda u ah oo aan khiyaamayn raggooda. Markii uu hawsha uu hayo uu ka yimaado, ayey u imanaysaa oo kala hadlaysaa sida Masiixu u wanaagsan yahay. Waxaanay ficil ku tusaysaa daacadnimadii iyo sida Ilaah raalli uga yahay in habluhu ay ka dambeeyaan raggooda.

Wuxuu markaa ninka qaba haweenayda masiixiyadda ah uu ogaanayaa inay xaaskiisu raalliyo tahay. Inaanay ku xad-gudbin isaga iyo inaanay dhegaysan hablaha doonaya inay ninkeeda ku diraan. Waxaa jira hablaha qaar oo markii ay arkaan gabadh ninkeeda raalliya u ah eegeega waxyaabo aanay haysan, waxaanay ku yiraahdaan ninkaagu miyuu dahab kuu gaday?

Miyuu kuraas iyo sariiro wanaagsan kuu dhigay, miyuu ku dejiyey guri fillo ah iyo wixii la mid ah. Waxay kaloo ku oran karaan miyaa ninkaagu ku jecel yahay? Oo haddii ay tiraahdo haa, waxay leeyihiin, **"Oo waxaannu aragnay isagoo gabdho la socda."** Waxay doonayaan inay kala diraan dadka is-jecel.. Kuwaas oo kale haweenayda masiixiyadda ah maqli mayso.

Waayo waxay rumaysan tahay hadalladii Ilaah ee lahaa: **"Wixii Ilaah isku xiray, ninna yaanu kala furin."** Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka ayaannu haatan idiin akhriyeynaa 3:3, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Isqurxintiinnu yaahay ahaan tan dibadda ah, oo ah timo tidcan, iyo dahab layska lulo, amase dhar la**

**xidho."**

Haddaba inta aanan aayadda fasirkeeda guud u guda-gelin, waxaa loo baahan yahay in marka ugu horraysa la fahmo in rasuulku uu san ka soo hor-jeedin is-qurxinta dumarka. Haddaba hadii aannu dib ugu noqonno wakhtigii reer Rooma iyo sidii dumarku dharka u xiran jireen, ayaa waxaa jiri jirtay in dumarku ay timaha aad uga shaqayn jireen. Waxay kaloo isku sharrixi jireen hawharadahooda, oo waxay qaadan jireen, isla sida maantaba ay tahay, dhar soo jiidanaya hablaha.

Maanta waxaad arkaysaa hablaha qaar oo jidhkooda qaybo ka mid ah bannaynaya, si ay ragga ku soo gacan-geliyaan, oo loo guursado. Ha yeeshee taasi keeni mayso guur lagu nasto oo lagu nagaado, laakiin ugu dambaysta waa la kala tagayaa. Haddii ninku jidhka awgii u yimid waxaa meelo kale oo isla deegaanka ah jooga naag kale oo isla sidaas oo kale jidhka bannaysata, oo haddana ilayn waa nin qof jir ah raadinaya e, mid kale ayuu u tegayaa, oo tii hore markii ilmo laga dhalo, oo jidhkeedu is-beddelo mid cusub buu kaga gudbayaa. Markaa habluhu taas way ku khaldan yihiin maanta.

Waxaan haddaba rumaysanahay in gabadha masiixiyadda ah ay u labbisato si hagaagsan oo weliba soo jiidasho leh, laakiin haddana aan jidhka meelihiisa muhiimka ah aan la bannaynaynin. Welibana waa inay isticmaalaan wax kasta ee ay jidhkooda ku qurxin karaan si ay hablaha kheyrkooda ah ula tartamaan, oo aanay ugu muuqan sida jangali. Hablaha qaar way u baahan yihiin inay marsadaan waxa dumarku isku qurxiyo, kuwana waay leeyihiin qurux dabiici ah oo

umaba baahna waxyaabaha laysku qurxiyo, laakiin waxay u baahan yihiin barafuun iyo wixii la mid ah. Wuxuu rasuul Butros halkan inoogu sheegayaa in habluhu aanay nin Masiixa u keeni karin iyagoo jidhkooda isticmaalaya. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska cutubka 3aad ee Warqaddan kowaad ayaa waxaa aayadda 4aadi leedahay sidatan:

**"Laakiinse ha ahaato inta qalbiga ee qarsoon, taasoo leh wax aan baaba'ayn ee ah ruuxa qabow oo aamusan, kaasoo Ilaah hortiisa qiimo badan ku leh?"**

Waxaa la doonayaa haddaba inay hablaha Masiixyiinta ah leeyihiin waxyaabo soo jiidanaya ragga, waana dabiicadahooda masiixinnimo ee gudaha laakiin maahan dharka ay xiran yihiin ama dahabkooda ama waxa ay is-mariyeen tan ahmiyadda lahaanaysa. Ahmiyaddu waxay noqonaysaa sida dabiicaddooda masiixinnimo ay tahay.

Waxaannu innaga oo dhan garanaynaa qisadii Ruut iyo Bocas oo labaduba ahaa kuwii uu ka soo farcamay Nebi Daa'uud iyo Sayid Ciise Masiix. Ruut waxay ahayd haweenay adadag, oo aad iyo aad Ilaah u jecel oo go'aan ku gaartay, inkastoo ay ahayd haweenay ka tirsan quruumaha, haddana doonaysay in Ilaahii Ibraahim, Isxaaq iyo Israa'iil, oo ah Uumaha dhulka darafyadiisa inay u adeegto.

Markii Bocas arkay in gabadhii Ruut ahayd ay lahayd dabiicado wanaagsan oox agga gudaha ah, ayuu jeclaaday. Markaa dhegaystayaal inkastoo waxyaalaha dumarku is-mariyaan aan laga soo hor-jeedin, haddana waxaa qorniinku adaynayaa in dabiicaddooda ka wanaagsan tahay sida jidhka ama

oogadeedu tahay. Waayo waa dabiicadda waxa reerka lagu dhaqo. Dabiicadda masiixinnimada waa dabeecadda ugu wanaagsan ee dunida ee qof Aadami ah yeesho. Waxaa loo baahan yahay in qofku xagga gudaha uu xoog ka leeyahay, khaasatan qofka dumarka ah oo leh reerka masiixiga ah. Sida aad doonto haddii aad tahay gabar masiixiyad ah dharka waad u xiran kartaa, laakiinse tan ahmiyadda leh maahan dharxirashadaada, laakiinse waa dabiicaddaada masiixinnimo.

Haddaan meeriska cutubka 3aad horey idiinku sii wado ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa dhegaystayaal, baalka 407 ee Axdiga Cusub aayadda 5aad, waxaana qoran sidatan:

**"Waayo, sidaasoo kalaa waagii hore dumarkii qoduuska ahaa oo Ilaah wax ka rajayn jiray ay isu qurxin jireen, iyagoo nimankoodii ka dambeeya."**

Haddaba waxaa marka la eegayo nolosha dumarka qoduusiinta ah ku qoran kitaabka Axdigii hore, dumar sharaf lahaa. Mid horay baan idiinku soo sheegay oo waxaya hayd Tuur, oo iyadu ayeeyo u ahayd nebi Daa'uud iyo weliba Ciise Masiix, dhanka hooyada. Waxaa kaloo laynoo sheegayaa in Raaxeen, oo ahayd haweenaydii labaad ee Yacquub ama Israa'iil ayay hayd gabadh aad u qurxoon.

Waxaana jeclaaday Yacquub, oo iyada aawadee buu toddoba sannadood oo kale u shaqeeyey abtigiis laabaan. Waxaanay nuurisay ama ifisay noloshii qaxarka iyo dhibka badnayd ee Nebi Yacquub. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska ayaan imminkana idiin akhriyayaa 3:6 ee isla Warqaddan kowaad ee Butros, waxaana qoran sidatan:

**"Saaraahba sidaasoo kalay Ibraahim u addeeci jirtay, oo ay ugu yeedhi jirtay, Sayidow; oo idinna haddii aad wanaag fashaan oo aydnaan ka cabsan wixii argaggax leh waxaad tihiin carruurteeda."**

**SONG: REEL---CUT----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin